# Dugsiyada Dadweynaha Portland: Janaayo 5teed Wararkii Ugu Dambeeyey ee Bulshada

**Janaayo 5, 2021**

Qoysaska iyo Shaqaalaha Qaaliga ee PPS,

Waxaanu si diiran idiinku soo dhaweyneynaa sanadka 2021 iyada oo sanadkii 2020 uu ahaa mid wata caqabado iyo iyada oo sanad-dugsiyeedku bilowgiisu ahaa mid aan hore inoo soo marin. Waxaan idiinka mahadcelineynaa sidii wada jirka iyo adkeysiga ahayd ee dhammaantiin gacmaha isku qabsateen sidii aan bulsho ahaan u waajihi lahaydeen xanuunka saf marka ahaa ee COVID-19.

Haddii aanu nahay macallimiiinta muddada dheer wax ka dhigayey Dugsiyada Dadweynaha Portland, waxa aan aqoonsanahay in ayna jirin wax bedeli kara in waxbarashada lagu qaato fasalada dhexdooda. Sidoo kale dugsiyada degmadani oo ka mid ah mida shaqaaleysiisa gobolkani, waxaan sidoo kale aqoonsanahay muhiimada aasaasiga ah inay tahay in mudnaanta la siiyo caafimaadka iyo fayo-qabka shaqaalaheena, sidoo kalena caafimaadka iyo fayo-qabka ardayda iyo qoysaska inta lagu gudo jiro xanuunkani.

Iyada oo si dhow loola shaqeynayo wada tashina lala sameynayo Guddoomiyaha Gobolka Kate Brown, Degmada Multnomaha, Waaxda Waxbarashada Oregon, iyo Dugsiyada Gobolka ku yaala ee waaweyn, Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay si dhow ula shaqeeyeen madaxda caafimaadka dadweynaha oo ay ka mid yihiin golaheena talo-bixinta caafimaadka, sidii ay noo wargeliyaan qorsheynteena. Marka laga yimaado dadaalada bulshadeena, xaddiga xanuunka COVID-19 iyo dadka u soo dhacay xanuunikani degmada Multnomah oo wali aad u sarreeya lana filayo in uu sarre u kaco wixii ka dambeeya maalmaha fasaxyada ka dib oo soo gabogaboobi kara ilaa inta laga gaarayo bisha Febraayo. Waa in sida xanuunkani u kordhayo ay wax ka iska bedelo ayaa loo baahan yahay. Waxa aan ka mid nahay dad fara badan oo u doodaya in tallaalka sida ugu degdeg badan suurtagalkana ah loo helayo loo qeybiyo.

Bishii Diisember 23keedii, Guddoomiyaha Gobolka Brown waxa ay bixisay tilmaamo cusub oo la raacayo sidii loo khafiifin lahaa guud ahaan gobolka, sidoo kalena shardi uga dhigeysa marka la ardaydu ay ku noqonayaan iskuulka. Waxa markiiba sida dib u eegis ku sameeyey hoggaanka saree e PPS tilmaamahani ay soo saartay Guddoomiyaha Gobolku ee ugu dambeeyey iyaga oo tixgalin siinaya waxa isbedeladani ay keeni karaan. Todobaadkani koox ka mid ah hoggaamiyaasha waxbarashada ee gobolka dhammaantiis, oo uu ka mid yahay Guddoomiyaha Waxbarashada PPS Guerrero, waxa ay la kulmoon Guddoomiyaha iyo kooxdeeda sidii ay uga wada hadli lahaayeen isbedeladani cusub ee ay soo saartay sidoo kalena caqabadaha wali jira sidii loo xalin lahaa ka hor inta aan tixgalinta la siin si buuxda dib loogu furo iskuulada.

Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS), oo ay ku lammaan yihiin dugsiyada degmada ee Gobolku, waxa

ay u soo jeedin doonaan isbedelada Waaxda Waxbarashada Oregon Iskuulada Diyaarka ah, Tilmaamaha Nabadgelyada Bartayaasha, haddaba si loo fudeydiyo meel marinta qaabka waxbarashada ee ardaydu inay ku noqdaan fasalada iskuulka si nabadgelyo leh. Diyaar baan u nahay sababtoo ah, waxaana anaka noo gaar ah in aan sameynay qorsheyn fara badan oo ah sida dib loogu noqonayo, waxbarashada, caafimaadka iyo nabadgelyada, iyo kooxo kale oo iyagu si firfircoon u sameynaayey qorsheyn kala gedisan oo suurtagal ah ilaa iyo dayrtii la soo dhaafay.

Anaka oo sii wadi doona qorsheynta qaababka dib loogu noqon karo, oo ah marka ay shuruudaha si nabadgelyo ah dib loogu noqon karo ay buuxiyaan in ardaydu ay fasaladoodu waxbarashada ku noqdaan, waxa aan sii wadi doonaan wada hadalada aan la leenahay saaxiibadayada shaqaalaha inaan ballaarino in waqtiga dhow la bixiyo fursado badan in arday koobani fasalada ku noqoto. Taasi oo ay la socoto daryeelka caruurta, ciyaaraha, iyo barnaamijyo kale oo xadidan ahna kuwa hadda iskuuladeena la bixiyo.

Rajada furitaanka iskuuladu waa mid adag,iyada oo dhowr arrimood oo fure u noqonaya in lagu go'aan qaato sidii ay ardaydu ugu soo noqon lahaayeen dhismayaasha iskuulada inta lagu gudo jira xanuunkani faafaya waxa ay yihiin. In dib loo furo iskuulada, waxa aan si degdeg ah ugu baahanahay taageero ballaaran oo aan ka helno gobolka. Waxaa ka mid ah:

- Inay cad tahay arrinta ku saabsan tallaalka shaqaalaha iskuulada sidii ay u eli lahaayeen,
- In mar walba si bilaash ah looga hubiyo ardayda iyo shaqaalaha cudurka COVID-19,
- Inay tahay mid cad lana socota isbedelada ku saabsan tilmaamaha loo raacayo dhinaca nabadgelyada ee ay bixiso Waaxda Waxbarashada Oregon(ODE), iyo
- Agabyo u dheeraad ah shaqaalaha sidii ay shaqaaluhu u buuxin lahaayeen tilmaamaha loo dhigay inay raacaan iyo ka hortago inuu xanuunkani ku faafo iskuulada.

Waxa aan sidoo kale ognahay in mar kasta oo ay inoo suurtagasho aan ku soo noqon karno waxbarashadii fasalada lagu qaadanayey, waxa aan u baahan doonaan in aan sii wado inaan bixino kor u qaadista taageerida shucuurta bulsho iyo waxbarashada in badan oo ka mid ah ardaydeena. Waxa aans ii wadi doonaa in aan la kaashano hay'adaha bulshada ee si gaar ah xooga u saara dhinaca dhaqanka kuwaasi oo bixinayey addeegyo lagama maarmaan u ah iyo barnaamijyo sanad-dugsiyeedka oo dhan, waxaana ka mid ahaa gaar ahaa ardaydeena aan cadaanka ahayn iyo qoysaskooda kuwaasi dhibaatooyinkani ay si gaar ah u taabteen.

Waxa aan jecelnahay inaan aqoonsano una mahadcelino dhammaan shaqaalaha madaalayaasha ah kuwaasi sii waday qeybinta addeegyada lagama maarmaanka ah iyo waxyaabaha taageeraya waxbarashada ardaydeena.  Waxa aan kale oo aan u mahadcelineynaa shaqaalaha nadaafada, shaqaalaha cuntada, wadayaasha basaska, macallilmiinta, shaqaalaha taageerayaasha ah,maamulayaasha iyo saaxiibada bulshada. Waxa aan sidoo kale rabnaa inaan aqoonsano deeqsinimada bulshadeena kuwaasi ugu deeqay The Fund for PPS iyaga oo ku deeqay ugu yaraan lacag ku dhow $1,000,000 sidii loo taageeri lahaa baahiyaha degdeg ah ee ay qabaan qoysaska PPS waqtigani COVID, iyada oo inta badan laga caawinayo qoysaska dhinaca addeegyada cuntada sidii looga ilaalin lahaa inay cunto yaraani soo faadsaarto, taasi oo ah in ay helaan agabyo dheeraad ah inta lagu jiro maalmaha fasaxyada ah.

Waxa aan sidoo kale idin siin doonaan wararka cusub ee soo kordha haddii aad tihiin shaqaalaha iyo qoysaska marka uu soo dhawaado simistarka koowaad oo ku saabsan rubuca saddexaad ee sanad-dugsiyeedka( kaasi oo bilaabmaya bisha Febraayo 1deeda). Waaxda Waxbarashada Oregon waxa ay ku tallo jirtaa in ay soo saaraan tilmaamo cusub ee la raacayo bisha Janaayo 19keeda.

Haddaba, waxaan sii wadi doonaa in aan ardayda siino waxbarasho ay guryahooda ku qaataan midii ugu fiicneyd ee aan siin karno. Waxa aan sidoo kale sii wadi doonaan inaan mudnaanta siino taageerida shucuurta ardeydeena iyo bulshada, sidoo kale in laga hadlo sidii wax looga qaban lahaa baahiyaha aasaasiga ah ee bulshadeena.

Waxaan idiinka mahadcelineynaa samirkiina iyo fahamka iyada oo aan dhammaanteen raadineyno sidii aan waqtiyadani adag uga bixi lahayn.